# Qabyo-qoraalka
## Wax-ka-bedelka iyo Kaabista
## Xeerka Diiwaangelinta Muwaadinnimada
## iyo
## Codbixiyayaasha
# Xeer Lr. 37/2007

## QAYBTA KOOWAAD
## Mabaadi'da Guud.

### Qodobka 1aad
### MAGACA XEERKA.

Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Muwaadinnimada iyo Codbixiyeyaasha.

### Qodobka 2aad
### ERAY-BIXINTA

Erayadan soo socda hadaan Xeerka si kale loogu sheegin waxa looga jeedaa macnaha ku hor qoran;

**Diiwaanka:** Waxa loola jeedaa diwaanka lagu qoro xogta Muwaadinniinta Warqadda Aqoonsiga iyo codbixiyayaasha

**Diiwaanda Guud**: Waxa loola jeedaa diiwaannada dhexe ee la dhigo xarunta Wasaaradda Arimaha Gudaha ama Komishanka Doorashooyinka kuwaas oo lagu kaydiyo dhammaan xogta muwaadiniinta.

**Cod-bixiye**: Waxaa loola jeedaa muwaadin kasta oo xaq u leh in uu wax doorto.

**Muwaaddin**: Waxaa loola jeedaa qof kasta oo buuxiyay shuruudaha uu tilmaamayo xeerka jinsiyaddu Xeer Lm. 22/2002.

**Diiwaanka Gobolka ama Degmada**: Waxaa loola jeedaa diiwaanka heer degmo ama Gobol ee Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda Codaynta.

**Warqadda Cod-bixinta**: Waxa loola jeedaa Warqadda la siiyo codbixiyaha marka la diiwaan-geliyo.

**Warqadda Aqoonsiga**: Waxaa loola jeedaa Warqadda aqoonsiga muwaaddinimo (teesarada)

**Komishanka**: Waxaa loola jeedaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka

**Wakiil Xisbi**: Waxa loola jeedaa xubinta uu xisbi u soo magacaabo in uu wakiil uga noqdo goobaha diiwaan-gelinta codbixiyayaasha.

**Goob-joogayaal**: Waxa loola jeedaa kormeerayasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diiwaan-gelinta codbixiyayaasha.

**Dastuur**: Waxa loola jeedaa dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Diiwaangelin**: Waxaa looga jeedaa Diiwaangelinta muwaadinniinta iyo codbixiyayaasha.

**Wasaarad** : Waxaa looga jeedaa Wasaaradda Arimaha Gudaha JSL.

**Diiwannada:** Waxaa looga jeeda Diiwana sugiga Muwaadinnimada iyo Codbixyayaasha.

## Qodobka 3aad.
## XADKA DHAQAN-GELINTA XEERKA

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa Diiwaangelinta sugidda muwaadinniinta iyo codbixiyayaasha ee Qaranka Somaliland oo ay u kala xilsaaran yihiin Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Komishanka Doorashooyinka qaranka una qabsoomaya siday ugu kala horeeyaan qodobkan.

## Qodobka 4aad
## ASAASKA DIIWAANNADA SUGIDDA MUWAADINNIMADA IYO CODBIXIYEYAASHA QARANKA SOMALILAND

Xeerkani waxa uu aasaasay **Diiwaannada Sugidda muwaadinka iyo cod-bixiyeyaasha** Qaranka Somaliland, Diiwaannadan oo lagu diiwaan-gelin doono muwaaddin kasta oo gaadhay da’da Diiwaangelinta Sugidda muwaadinka iyo ta codbixinta.

**Qodobka 5aad**

**LA HAANSHAHA DIIWAANNADA**

Diiwaannadu waa hanti ummadeed, diiwaanka Codbixiyayaashana Xisbi kasta oo siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu la socdo habaynta, dhaqan-gelinta, iyo daabacaadda Diiwaanka.

**Qodobka 6aad**

**DADKA AY REEBAN TAHAY IN LA DIIWAANGELIYO**

Waxa reebban in shaqsiyaadka hoos ku xusan la oo diwaangeliyo Warqadda Aqoonsiga ama codbixiyayaal ahaan: -

1. Qofka aanu xuskiisu dhamayn (waalan)
2. Maxaabiista Xukuman ama gar-sugayaasha ah.
3. Ajnabiga dalka gudihiisa ku sugan
4. Qofka aan gaadhin da'da diiwaangelinta.

**Qodobka 7aad**

**ANSIXINTA DIIWAANGALINTA**

Wasaaradda Arimaha Gudaha ayaa ka mas'uul ah ansixinta Diiwaangelinta Muwaadinnimada iyada oo Komishankuna xil ka saaran yahay ansixinta Diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee doorasho kasta. Hase ahaatee, Komishanku waa in uu furo diiwaangelinta codbixiyeyaasha muddo aan ka yarayn Lix bilood ka hor xilliga doorasho kasta si loo diiwaan-geliyo codbixiyeyaasha cusub loona tirtiro codbixiyeyaashii hore loo diiwaan-geliyay ee xeer ka reebay in dib loo diiwaangeliyo.

**Qodobka 8aad**

**DADKA AAN LAHAYN AWOODA SAXEEXA.**

Muwaadinku wuxuu ku saxeexayaa foomka diiwaangelinta suulka gacanta bidix, haddii uu naafo ka yahayna wuxuu adeegsanayaa suulka gacanta midig, haddii uu labadaba la'yahay waxa uu adeegsanayaa mid ka mid ah faraha kale ee gacmaha, hadduu tobankaba la'yahayna waxa u saxeexaya mas'uulka diiwaangelinta, waana in arrintaa lagu qoraa foomka diiwaangelinta.

**Qodobka 9aad**
**HABKA XAFIDAADA QALABKA DIIWAANGELINTA**

1. Marka ay dhammaato hawl-maalmeedka shaqo ee diiwaangelintu Dhammaan qalabka loo isticmaalay diiwaangelinta waxa lagu celinayaa Xafiiska Degmada, haddii sidaas la yeeli waayana mas'uulka diiwaangelinta ee Degmada waxa xil ka saaran yahay inuu sida ugu dhakhsaha badan ugu war-geliyo booliiska, isla markaana uu faro in mas'uulka khaladkaas ku kacay la soo qabto, loona keeno mas'uulka degmadda, haddii uu khaladku yahay mid ku yimi dhayal si ama si niyad xummo ah mas'uulka degmaddu waxa uu isla markaana Shaqada ka saarayaa mas'uulka ku kacay falkaas ama waxa lagu ciqaabaya Xeerka ciqaabta guud, iyada oo loo eegayo xaaladda iyo hadba culayska fal danbiyeedku uu leeyahay.
2. Meelaha ay jirto gaadiid xumo qalabka diiwaangelintu waxa ka mas'uul noqonaya diiwaangeliyaha oo todobaadkiiba hal mar u gudbinayaa diiwaangeliyaha degmadda, hase yeeshee mas'uulka diiwaangeliyaha ah waxa uu xil ka saaran yahay qorista iyo xafidaada diiwaanadda hawl-maalmeedka diiwaangelinta oo dhan.
3. Hawl-maalmeedka goobta diiwaangelinta waxa la bilaabaya lixda subaxnimo, waxayna dhammaanaysaa lixda galabnimo, haddii dib u dhac ku yimaadana waa in lagu caddeeyaa warbixinta sababta keentay dib-u-dhaca, haddii dib u dhacu aanuu garawshiiyo lahayn waa in mas'uulka diiwaangelinta ee degmaddu talaabo ka qaado, sidaasna uu war bixin ugu gudbiyo mas'uuliyiinta ka saraysa, haddii ay gaadho lixda galabnimo oo ay joogaan dad aan la diiwaangelin waxa loo raacaya Xeerka Doorashooyinka, waxaana la diiwaangelinayaa dadkaas ilaa inta ay ka dhammaanayaan dadka markaa joogaa.

**Qodobka 10aad**
**HAB-QORAALKA MAGACA MUWAADINKA**

Magaca muwaadinka waa in lagu qoro xuruuf la isla wada sar-gooyey; waana in aanay kala duwanaanin.

**Qodobka 11aad**
**SAXITAANKA XOGAHA KHALDAMA**

1) Muwaadinka ku arka liiska diiwaangelinta xog khaldan oo isaga ku saabsan, waa in uu u sheego mas'uulka diiwaangalinta kuna qoro oo saxeexo foomka loogu talo galay arintan. Mas'uulkanina waa inuu sida ugu dhakhsaha badan u sameeyo sixitaan, warbixinna u gudbiyo mas'uulka diiwaanka heer qaran isagoo u sii marinaya mas'uullada heer Degmo iyo Gobol.
2) Marka ay dhammaato muddada loogu talo galay beddelka iyo sixitaanku, mas'uulka diiwaangalinta Qaranku wuxuu xog faahfaahsan ka diyaarinayaa dhammaan wixii is-beddelay, wuxuuna xogtan u gudbinayaa mas'uulka ay khusayso si loo ansixiyo loona ogolaado in isbeddeladan la geliyo Diiwaanka.

## Qodobka 12aad
## NOOCA WARQADDA AQOONSIGA IYO WARQADDA CODBIXINTA

1. Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda cod-bixintu waa in ay ka samaysan yihiin shay aan si fudud u duugoobayn ama dhammaanayn oo aan waxlaga bedelikaraynin ama la been abuuri kareyn.

2. Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda cod-bixintu wuu nasakhmayaa lana ogolaanmaayo haddii ay warqaddu tirtiran tahay ama ay qaybi ka maqan tahay oo aan la akhriyi karayn.

## Qodobka 13aad
## LUMISTA WARQADDA AQOONSIGA AMA WARQADDA CODBIXINTA

Qof kasta oo ay ka lunto ama ka xumaato Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda cod-bixintu, waxa uu waydiisan karaa mas'uuliyiinta u xilaaran, mas'uuliyiintuna waa in ay siiyaan Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda cod-bixineed oo cusub, oo sidata xogtii iyo tixraacii hore marka sidaas laga soo codsado, lana caddeeyo sababta lumista.

Qofka uu ka xumaadaa waxa uu mutaysanaya in loo bedelo marka uu keeno warqaddii xumaaday.

## Qodobka 14aad
## DHAWRISTA XOGTA MUWAADINKA

Xogta Diiwaannadu waa sir u gaar ah Qaranka iyo qof kasta oo muwaaddin ah oo is-diiwaangeliyey, sidaas daraadeed:

1) Sifo aan Sharciga waafaqsanayn loogama faa'iidaysan karo, looma gudbin karo, loomana beddeli karo.
2) Qof kasta oo, sifo aan Sharci ahayn ula baxa, u bixiya ama xada waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sano oo xadhig ah.
3) Habka dacwada waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta.
4) Xogta Muwaadinka waxa la siin karaa hay'adaha nabadgalyada, haddii ay lagama maarmaan u tahay amniga iyo nabadgalyada guud ee qaranka iyo muwaadiniinta, waxaana lagu bixin karaa oo kaliya haddii uu sharci sidaas waajibiyo ama amar ay soo saartay Maxkamad awood u lihi.
5) Waxaa reebban in Xogta Muwaadiniinta loo gudbiyo dal shisheeye ah.

**Qodobka 15aad**
**QAADASHADA WAX KA BADAN HAL WARQAD AQOONSI AMA WARQADDA CODAYNTA**

Waxaa reebban in uu Muwaaddinku qaato wax ka badan hal **Warqad Aqoonsi ama Warqad Codbixineed.**
Haddii uu Muwaaddinku si khiyaamo ah u qaato, wax uga beddelo, u been abuuro Warqad Aqoonsi ama Warqad Codbixineed iyo wax ka badan **w**axa uu mutaysanayaa Ciqaabta ku xusan xeerkan.

# QAYBTA 2AAD.

**Qodobka 16aad.**
**DIIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA.**

Marka diiwaan-gelinta Sugidda muwaadinnimada la sammaynayo waa in la sugo Muwaadinnimada Qofka reer Somaliland ah.

**Qodobka 17aad**
**SUGITAANKA MUWAADINKA**

Sugitaanka muwaadinka waxaa loo raacaya sidan soo socota:

1. Qofka raba in uu is diiwaan-geliyo waxaa xaqiijinaya Caaqil, waxaana ansixinaya Wakiilka Maxkamadda ka dib markuu sidaa ku dhaariyo Caaqilka.

2. Marka ay sugnaato Muwaadinnimada qofka is diiwaangelinaya, waxa mas'uulka goobtu xogta muwaadinka gelinaya foomka rasmiga ah ee Diiwangelinta, wuxuuna xaq u yeelanayaa warqadda aqoonsiga.

**Qodobka 18aad**
**HAWL-GALKA DIIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA.**

Bilawga hawl-galka diiwaangelinta Muwaadiniinta waxa sal-dhig u ah qoddobadan soo socda oo ay waajib tahay in la dhammaystiro.

1. Marka diiwaan-gelinta Warqadda Aqoonsiga la sammaynayo waa in la sugo Muwaadinnimada Qofka reer Somaliland.

2. Marka ay sugnaato Muwaadinnimada qofka is diiwaangelinayaa, waxa la gelinayaa xogtiisa form-ka rasmiga ah.

3. Waxa isla goobtaasi lagu siinaya qof kasta oo ay sugnaato muwaadinnimadiisu warqad aqoonsi oo ku-meel gaadh ah.

4. Qofkasta oo ku guul-daraysta in uu caaq il ka hor-caddeeyo Muwaadinnimadiisa waxa lagu war-gelinayaa in uu keeno qof la yaqaan oo hanti ma-guurta ah ku leh Deegaanka/Dalka, oo caddeeya in uu yahay muwaadin Reer Somaliland ah, kuna dammiinto hantidiisa.

## Qodobka 19aad
## NIDAAMKA DIIWAANGELINTA MUWAADINKA

Maalin kasta inta aan la furin goobta diiwaangelinta waxaa mas'uuliyiinta Goobta ku waajib ah:-

1. In ay is-xaadiriyaan, islamarkaana ay saxeexaan qalabka diiwaangelinta iyagoo diiwaangelinaaya lambarka tixraaca Foom-ka Diiwaan-gelinta ee ay maalintaa ku shaqaynayaan.
2. Marka shaqo maalmeedka la soo gebagebeeyo waa in qoraal lagu cadeeyo tirada muwaaddiniinta la diiwaangeliyey maalintaa, isla markaana ay saxeexaan hawl-wadeenaddu.
3. Inay diiwaan-geliyaan dhacdooyinkii ay la kulmeen maalintaa.

## Qodobka 20aad
## DHAQAN-GELINTA DIIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA

Iyada oo la adeegsanayo dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka:

1. Waa in la daabaco, islamarkaana la baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta Muwaadinnimada iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.

2. Waxaa waajib ah in la baro islamarkaana lagu wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelinta Muwaadinnimadu leedahay.

## QODOBKA 21AAD
## FOOMKA DIIWAAN-GELINTA MUWAADINNIMADA

Foomka diiwaan-gelinta ayaa sal-dhig u noqonaya diiwaan-gelinta Warqadda Aqoonsiga Muwaadinka, waxaana lagu qorayaa ugu yaraan xogaha hoos ku xusan ee muwaadinka:-

1. Magaca muwaadinka oo afran.
2. Magaca Hooyada oo saddexan.
3. Sanadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay
4. Lab ama dhedig.
5. Saxeexa Muwaadinka ama tilmaan muujinaysa in aanu saxeexi karayn.
6. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay muwaadinka.

**Qodobka 22 aad**
**XOGTA LAGU QORAYO WARQADDA AQOONSIGA**

Warqadda Aqoonsiga Muwaadinnimada waxa waajib ah in ay ku qornadaan xogtan hoose:-

1) Magaca oo afran.
2) Taariikda dhalashada.
3) Sawirka muwaadinka.
4) Lambarka Warqadda aqoonsiga (ID card) .
5) Goobta Dhalashada.
6) Jinsiga (Lab ama Dhedig).

**Qodobka 23aad**
**<u>SHAQAALAHA DIIWAAN-GELINTA SUGIDDA MUWAADINNIMADA.</u>**

1. Si loo dhaqan-geliyo diiwaan-gelinta muwaadinnimada, Wasaaradda Arimaha Guduhu waa in ay shaqaaleeysiisaa shaqaale khibrad iyo xirfad u leh dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta, oo ay ka mid yihiin:
    a) Mas'uulka Diiwaanka Qaranka ee Warqadda Aqoonsiga oo mas'uul ka noqon doona maamulka Diiwaanka Warqadda Aqoonsiga, islamarkaana ah madaxa Waaxda Diiwaan-gelinta ee Warqadda Aqoonsiga oo Xarunteedu tahay Wasaaradda Arimaha Gudaha.
    b) Mas'uulka Diiwaanka Warqadda Aqoonsiga ee Degmo kasta;
    c) Mas'uulka Diiwaanka Warqadda Aqoonsiga ee Gobol kasta.
2. Shaqaalaha loo qaadanaayo xafiisyada kala duwan ee Diiwaan-gelinta warqadda aqoonsiga waa in ay noqdaan dad reer Somaliland ah oo ka madax-bannaan siyaasadda oo lagu soo xushay khibradda iyo aqoonta looga baahan-yahay booska ay ka shaqaynayaan.
3. Inta aan qofka la shaqaalayn, waa in la qeexo:
    a) Shuruudaha iyo xirfadaha looga baahan yahay qofka loo qaadanaayo booska;
    b) Habka loo raacayo xulashada Shaqaalaha; iyo
    c) Waajibaadyada shaqo ee qof kasta (boos kasta) uu ku lahaanayo geeddi-socodka hawsha Diiwaan-gelinta.

**<u>Qodobka 24aad</u>**
**<u>DOORKA SHAQO EE WASAARADDA EE DIIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA</u>**

Wasaaraddu waa in ay;-

1. Kala caddayso jinsiyadda shakhsiyaadka raba in ay isu diiwaangeliyaan Warqadda Aqoonsiga.

2. Daabacdaa, habaysaa, dhaqan-gelisaa diiwaanka sugidda muwaadinnimada.

3. Wasaaradda Arimaha Guduhu waxay soo saaraysaa Xeer-nidaamiyayaal, Go’aamo, Habraacyo iyo amarro lagu dhaqangelinayo Diiwaangelinta Muwaadinnimada.

# <u>QAYBTA SADEXAAD.</u>

**Qodobka 25aad**
**<u>DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYEYAASHA</u>**

Qofkasta oo raba in uu isu diiwaangeliyo codbixiye Doorashooyinka Qaranka (Madaxtooyada iyo Baarlamaanka) iyo Dawladaha Hoose waa in uu sitaa Warqadda Aqoonsiga Muwaadinka.

**<u>Qodobka 26aad.</u>**
**<u>DIIWAANGELINTA CODBIXIYEYAASHA</u>**

1) Doorashooyinka Qaranka iyo Dawladaha Hoose waxa ka codayn kara oo keliya qof muwaaddin ah oo ku diiwaangashan Diiwaanka Codbixiyaha.
2) Liiska diiwaanka coodbixiyaha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka laba bilood ka hor xilliga doorshada.
3) Diwaangalinta codbxiyayaasha laguma xidhi karo lacag lagu bixinaayo ama shuruud kale oo lacageed ama kharash gelinaaya codbixiyaha.

**Qodobka 27aad**
**SHAQADA KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA**

Iyada oo aan waxba loo dhimayn xilka iyo waajibaadka Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee xeerarka kale u xil-saareen komishanku;-

1. Waxa uu dalka Somaliland ka dhaqan-gelinayaa hawsha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ka hor taariikhda doorashada.

2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ka mas'uul ah habaynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda diiwaanka codbixiyeyaasha.

3. Komishanka Doorashooyinka Qaranku wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiyayaal, Go'aamo, Habraacyo iyo Amarro lagu dhaqangelinayo Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

## Qodobka 28aad
## KU DHAWAAQIDDA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA

Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya xilliga la bilaabaayo Diiwaangelinta codbixiyeyaasha, isaga oo ku soo saaraya Xeer Madaxweyne ka dib marka uu helo soo-jeedinta Komishanka Doorashooyinka Qaranka muddo shan iyo toban maalmood gudahood ka bilaabanta uu helo soo-jeedinta.

## Qodobka 29aad
## DHAQAN-GELINTA DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA

1. Komishanku waa in uu dhaqan-geliyaa diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ugu yaraan lix bilood ka hor maalinta doorashada.
2. Muddada ay Diiwaan-gelinta Codbixiyayaashu soconayso iyo Hab-raacaba (procedure) waxa uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku kusoo saarayaa Xeer-hoosaad (Regulations).
3. Komishanku isagoo adeegsanaya dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka, waa in uu daabaco, islamarkaana baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.
4. Komishanka waxaa ku waajib ah in uu baro, islamarkaana ku wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelinta codbixiyayaashu leedahay.
5. Si arrintaa loo suurto-geliyana Komishanku waa in uu diyaariyaa barnaamijyo qayb ka ah geedi-socodka Diiwaan-gelinta oo loogu talogalay in lagu baro laguna wacyi geliyo dadwaynaha in ay isu diyaariyaan **diiwaangelinta codbixiyayaasha.**

## Qodobka 30aad
## FOOMKA DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA

Foomka diiwaan-gelinta codbixiyayaasha ayaa sal-dhig u noqonaya diiwaan-gelinta codbixiyayaasha, waxaana lagu qorayaa xogaha hoos ku xusan:-

1. Magaca Codbixiyaha oo afran una qoran sida uu ugu qoranyahay Warqadda Aqoonsiga.

2. Sanadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay
3. Lab ama dhedig
4. Saxeexa codbixiyaha ama tilmaan muujinaysa in aanu codbixiyuhu saxeexi karayn.
5. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay codbixiyaha
6. Lambarka tix-raaca diiwaan-gelinta codbixiyaha
7. Lambarka warqadda Aqoonsiga (ID Card Number)

## Qodobka 31aad
## XOGTA LAGU QORAYO WARQADDA CODAYNTA

Warqadda cod-bixinta waxa waajib ah in ay ku qornadaan xogtan hoose:-

1. Magaca oo afran.
2. Lambarka Warqadda aqoonsiga (ID card) .
3. Lambarka Tixraaca Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha .
4. Sanadka uu dhashay.
5. Jinsiga (Lab ama Dhedig).

## Qodobka 32aad
## SIXITAANKA IYO MURANKA DA’DA CODBIXIYAHA

Da’da codbixiyaha waxaa lagu jaangoynayaa da’da muwaadinka ee ku qoran Warqadda Aqoonsiga ee Muwaadinka.

## Qodobka 33aad
## SHAQAALAHA DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA

1. Si loo dhaqan-geliyo diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha, Komishanku waa in ay shaqaaleeyaan shaqaale khibrad iyo xirfad u leh dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta, oo ay ka mid yihiin:

a) Mas’uuliyiinta Diiwaanka Codbixiyayaasha oo mas’uul ka noqon doona maamulka Diiwaanka, islamarkaana ah madaxa Waaxda Diiwaan-gelinta Warqadda Codbixinta oo Xaruntiisu tahay Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
b) Mas’uulka Diiwaanka codbixiyayaasha ee Goob kasta;

c) Mas'uulka Diiwaanka codbixiyayaasha ee Degmo kasta.

d) Mas'uulka Diiwaanka codbixiyayaasha ee Gobol kasta.

2. Shaqaalaha loo qaadanaayo xafiisyada kala duwan ee Diiwaan-gelinta Codbixiyayaashu waa in ay noqdaan dad reer Somaliland ah oo ka madaxbannaan siyaasadda oo lagu soo xushay khibradda iyo aqoonta looga baahan yahay booska uu ka shaqaynaayo.
3. Inta aan qofka la shaqaalayn, waa in la qeexo:
a) Shuruudaha iyo xirfadaha looga baahan yahay qofka loo qaadanaayo booska;
b) Habka loo raacayo xulashada Shaqaalaha; iyo
c) Waajibaadyada shaqo ee qof kasta (boos kasta) uu ku lahaanayo geeddi-socodka hawsha Diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha.

## Qodobka 34aad

## HABKA IYO GOOBAHA DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA

1. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa Xeer-hoosaad (Regulations) faah-faahsan ku soo saaraya Habka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha iyo Goobaha Diiwaangelinta ee Degmo iyo Gobol.

**2.** Sidoo kale waxa uu Komishanku Xeer-hoosaad kusoo saarayaa in uu Muwaaddinku farsamo ahaan iska diiwaangelin karo goobta ama Magaalada uu joogo balse uu doorto meesha uu ka codaynaayo.

## Qodobka 35aad

## WAKIILLADA ASXAABTA QARANKA (GOOB-JOOGAYAAL) EE DIIWAANGELINTA CODBIXIYAHA

**1.** Xisbi kasta oo siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay inuu wakiil u soo dirsado goob kasta oo ay ka dhacayso diiwaan-gelinta Codbixiyayaashu.

**2.** Wakiilada Xisbiyadu waxa ay hubinayaan:

B. in geeddi-socodka diiwaan-gelintu Codbixiyayaashu waafaqsan yahay Xeerka.
T. in aanay dhicin wax kala takoorid ahi, iyo
J. in aan muwaaddin looga reebin diiwaan-gelinta codbixiyayaasha si sharci-darro ah.
Wakiillada Xisbiyadu way diiwaangelin karaan wixii cabasho ah ee arrimahaas ku saabsan kana dhaca goobta.

**Qodobka 36aad**
**HAWSHA MAS'UULKA KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA EE GOOBTA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAHA.**

1. Mas'uulku waa inuu waydiiyo codbixiyaha in ay rasmi yihiin xogaha la geliyay foomka muwaadinnimada.
2. Mas'uulku waa inuu xogta sare ku xusan geliyo Foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha, isla markaana uu u akhriyo cod-bixiyaha.
3. Cod-bixiyuhu waa in uu saxeexo Foomka diiwaan-gelinta codbixiyaha ama sida kale ee ku xusan qodobka 8aad ee Xeerkan.

**Qodobka 37aad**
**SOO SAARISTA IYO DAABACAADDA LIISASKA CODBIXIYAYAASHA**

Komishanka Doorashooyinka Qaranku, isagoo ku salaynaya liiska magacyada diiwaanka ku jira, waa in uu soo saaro liisas codbixiyayaasha ee lagama-maarmaanka u ah qabsoomidda Doorashada. Si uu u noqdo liis codbixineed oo rasmi ah **(official**). Liis kastaa waa inuu yeeshaa shaambadda Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 38aad**
**SOO SAARISTA LIISASKA KAMA DAMBAYSTA AH EE CODBIXIYAYAASHA**

1) Marka la diiwaangeliyo dhammaan wixii isbeddel ah, waxaa la diyaarinayaa liiska kama dambaysta ah oo noqonaaya liiska uu Komishanka Doorashooyinku amri doono in laga daabaco dhammaan liisaska loo baahan yahay sida ay waajibinayaan Xeerarku.

2) Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxaa ku waajib ah in uu siiyo Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Xisbiyada Siyaasadda liiska codbixiyayaasha ee kama danbaysta ah.

**Qodobka 39aad**
**QAYBINTA WARAAQAHA COD-BIXINTA**

Komishanku waa inuu siiyo Warqadda Cod-bixinta muwaadin kasta oo isdiiwaangaliyay.

**Qodobka 40aad**
**GOOB-JOOGAYAASHA**

Goobjoogayaasha ama kormeerayaasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diwaan-gelinta cod-bixiyayaasha, waxaa Wasaaradda Arimaha Gudaha u soo

gudbinaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka, si ay go’aan uga gaadho ogolaanshaha dal ku galka.

## Qodobka 41aad
## WAAJIBAADKA HAY’ADDAHA DAWLADDA.

Madaxda Dawladda, Hay’addaha Sharci Fulinta, Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Xisbiyada Siyaasiga ahba waxaa xil ka saaran yahay ku dhaqanka iyo meel-marinta Xeerkan.

## Qodobka 42aad
## CIQAAB

1) Qof kasta oo is diiwaangeliya ka badan hal mar ama been ka sheega xogtiisa waxa uu mutaysayanaa ciqaab dhan 3 bilood oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,000 (Hal Milyan oo Somaliland Shilin ah).
2) Qof kasta oo isdiiwaangeliya hal mar wax ka badan, waxa uu waayayaa Xaqa Codbixinta ee doorasho illaa inta diiwaangelinta dambe laga gaadhaayo.
3) Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somaliland ah oo isku daya inuu is diiwaan geliyo wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 5 bilood oo xadhig ah oo aan iib lahayn, ganaax 2,000,000 (Laba Milyan Somaliland Shilin ah) iyo dalka oo laga masaafuriyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah.
4) Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somaliland ah oo is-diiwaangeliya wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 10 bilood oo xadhig ah oo aan iib lahayn, ganaax dhan 4,000,000 (Afar Milyan Somaliland Shilin ah) iyo dalka oo laga masaafuriyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah.
5) Mas’uul kasta oo ka shaqeynaya diiwaangalinta oo isaga oo og fududeeya ama geliya Diiwaanka qof wax ka badan hal mar wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sano oo xadhig ah.
6) Qof kasta oo been abuur ku sameeya Waraaqaha Codbixinta ama Diiwaanka Codbixiyeyaasha wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sanno oo xadhig ah.

## Qodobka 43aad
## NASAKHAAD

Xeerkani waxaa uu nasakhayaa ama burinayaa (null and void) dhamaan xeerarka ama qodobada Xeer ee ka hor imanaaya xeerkan.

## Qodobka 44aad
## DHAQAN-GALKA XEERKA

Xeerkani waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Madaxweynuhu saxeexo, faafinta rasmiga ahna lagusoo saaro.